

KU: Guddoomiyaha iyo Xubnaha, Guddiga Dugsiyada Boston
KA: Nathan Kuder, Madaxa Dhaqaalaha
TAARIKHDA: Diisambar 16, 2020
MAWDUUCA: Warbixinta Miisaaniyadda FY21

Kooxdayadu waxay rajeyneysaa inay u soo bandhigto guddigaan saadaasheena maaliyadeed ee FY21.

Waxaan geeddi-socodkeena miisaaniyadda ku bilownay bayaan ka soo baxay siyaasadda fursadda iyo guusha maxaa yeelay shaqadeenu waxay diiradda saarayaan yareynta caqabadaha ka jira helitaanka fursadaha waxbarasho ee adag iyo buuxinta nusqaamaha guul-darrada joogtada ah. Ahmiyadaas waxba iskamay badalin muddadaan khalkhalka iyo hubanti la'aanta jirtay.

Warbixinta Miisaaniyadda FY21

Waxaa ku jira xirmadaan waa Warbixinta Miisaaniyadda Billaha ah ee FY21 ee muddada ku eg Oktoobar 31, 2020. Warbixintani waxay ka kooban tahay waxyaabaha soo socda:

- **Guudmarka Warbixinta:** Warbixintani waxay bixinaysaa Miisaaniyad la Ansixiyay, Miisaaniyada Hadda ah, Kharashaadka Sanad illaa Hadda ah, Boqolkiiba inta la Kordhiyay, Kharashaadka la Odorosay, iyo Kala Duwanaanshaha Miisaaniyada la Ansixiyay iyo Kharashyada la Odorosay. Waxay xog iskugu keenaysaa qaybaha xisaabaadka ee heer-sare ah. Waxaa jira jadwal gooni ah oo loogu talagalay sanduuqa guud iyo deeqaha. Waxaa caadi ahaan loo maleynayaa in deeqaha si buuxda loo isticmaali doono.
- **Warbixin Faahfaahinsan:** Warbixinnadaasi waxay bixiyaan xog la mid ah kuwa lagu bixiyey Guudmarka Warbixinta ee heer xisaabeed oo faahfaahsan.

Kani waxa uu ahaa sanad gaar ah marka loo eego kharashaadka la odorasay waxaana isticmaalnay dib u eegis aad u xeel dheer, oo tayo leh oo ku aadan kharashkeena waxaana u baahan nahay inaan abuurno saadaal sax ah inta sanadka ka hartay.

Laga bilaabo Oktoobar 31 2020, warbixintu waxay muujineysaa hoos u dhac suurtagal ah oo ku dhow \$6-7 milyan. Qiyaastan hooa u dhaca ah waxay la jaanqaadaysaa saadaasha sannadihii hore ee xilligan oo kale ahayd. Waxaan rajeyneynaa isku-darka maareynta kharashaadka ku baxa meelaha halista ah, iyo wararka wanaagsan ee suurto-galka ah ee ka imanaya Gargaarka Federaalka iyo Gobolka ee la xiriira COVID ayaa awood noo siinaya inaan sannadka ku dhammayno miisaaniyadda.

Qodobada ugu waaweyn ee sababay heerka aan hadda joogno waxaa ka mid ah:

- **Mushaaraadka - Celceliska mushaharka soo galaya qiyaas ahaan (\$6-7M),** laakiin lagu dheelitiraayo baahida loo qabo in lagu daboolo mushaaraadka shaqaalaha Adeegga Cuntada sababo la xiriira dib-u-bixinta lacagaha oo yaraaday. Goobta mashaariicda ee mushaharku laga bixinayo ayaa xoogaa

ka duwan sidii hore sababo la xiriira jawaab celinada COVID, iyada oo lacag badan lagu bixinayo akoonada Fasaxa.

- Adeegyada - Saadaasha Covid waxay ku saleysan tahay isticmaalka dhismaha ee "COVID".
- Khatarta COVID - Waxaan saadaalinaynaa inaan u baahanno inaan xoogaa maaliyad guud u isticmaalno waxyaabaha loogu talagalay dib-u-furidda dhismaha iskuulka. Maaddaama maalgelin dheeraad ah lagu heli doono dadaallada Gobolka iyo Federaalka, waxaan u maleyneynaa in isticmaalka Sanduuqa/lacagaha Guud ay hoos u dhici doonto.
 - Kuwaani waa tusaalooyin qaar ka mid ah kharashyada aan odorosay ee COVID. Qaar badan oo ka mid ah kharashaadkan waxaa looga badbaadi doonaa taageerooyinka jira ee federaalka, gobolka iyo Magaalada Boston ay bixiyaan.
 - **Caafimaadka iyo Badbaadada, PPE, Nadaafada:** Qeybtaan waxaa ka mid ah waxyaabaha sida dayactirka daaqada, nadiifinta hawada, marwaaxadaha, PPE-da Ardayda iyo Shaqaalaha, iyo nadiifin dheeri ah. Waxyaabahani waxaa ku kici karaa inta u dhexeysa \$15-20M ee FY21.
 - **Taageerada Tacliinta:** Waxaa jiray kharashyo dheeraad ah oo laxiriira u guuritaankeena waxbarashada khadka tooska ah sida laptop-yada, internetka guriga, iyo aaladaha waxbarashada internetka ah. Waxbarashada dheeriga ah ee waqtiga dugsiga ka baxsan sida xagaaga iyo fasaxyada dugsiga, iyo sidoo kale adeegyada waxbarashada qaaska ah ee magdhowga leh ayaa sidoo kale loo baahan doonaa si ardaydeena loogu soo celiyo wadada saxda ah. Waxyaabahani waxaa ku kici karaa inta u dhexeysa \$15-20M ee FY21.
 - **Cuntada iyo nafaqada:** In kasta oo iskuuladu ay ku jiraan jawi waxbarasho oo khadka tooska ah iyo mid isku dhafan, tirada adeegyada cunnada iskuulka ee la bixiyo ayaa hoos u dhacay. Tirada cuntada la bixiyo waxay bixisaa dakhliga lagu kharasheeyo barnaamijkeena adeegga cuntada. Luminta dakhligan, oo ay weheliso kororka qiimaha cuntada guryaha loo qaato iyo sida ay nooga go'an tahay inaan joogteeyno heerka shaqaale ee aan haysano waxay horseedaysaa luminta suurtagalka ah ee \$20M ee FY21.

Waxaan rajeyneynaa inaan bixinno warbixinada miisaaniyadda bil kasta si aan u sii wadno wadahadalada ku saabsan heerka miisaaniyaddayada ee FY21 iyo sanadaha soo socda. Waad mahadsan tahay.

Bogga 2

Dugsiyada Dadweynaha ee Boston
Dr. Brenda Cassellius, Maamul guud

Guddiga Dugsiyada Boston
Alexandra Oliver-Davila, Guddoonka

Magaalada Boston
Martin J. Walsh, Duqa Magaalada

